


# Tilmaam bixiyaha dadka cusub

Maktabadda guud ee Denver waxey kuu heysaa goobo lagugu soo dhaweynayo, halkaasoo qofkasta uu xor u yahay inuu wax baarto, barto, abuuro, kana mid noqdo. 26 goobood oo magaalada ah ayey maktabaddu uga adeegtaa bulshada iyadoo dabooleysa baahiyaha asaasiga ah ee bulshada ka caawinaya iney wada xiriiraan, koraan hormarna sameeyaan. Intaa oo dhan waa bilaash.

## MAKTABADDU WAXA AY U FURANTAHAY QOFKASTA

Waa run. Qofkasta oo jooga Colorado waxa uu si bilaash ah ku adeegsan karaa maktabada guud ee Denver –muhiim ma ahan meesha aad ku dhalatay iyo dhirirka mudada aad booqan jirtay maktabada.

## MAXAAD KU QABAN KARTAA MAKTABADA?

Waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameyn karto intaa aad maktabadda joogto. Waxaa laguu ogolyahay inaad:

- Amaahsato buugaag, majallado, muuqaalo iyo heeso, una qaadato gurigaada muddo dhan 1-3 asbuuc. Waxyaabo badan ayaad u heli kartaa si online ah.
- Adeegso kumbiyuutaro, madbacado iyo koobi.
- Weydiiso shaqaalaha maktabadda caawimaad si aad u hesho xogta aad raadineyso.
- Baro ingiriis.
- Isku diyaari imtixaanka qaadashada dhalashada.
- Xiriir la yeelo bulshada iyo faaiidooyinka guud.
- Hel caawimaad ku saabsan sidi aad shaqo ku heli leheyd.
- Hel caawimaad ku saabsan sidi aad ganacsi u bilaabi leheyd.
- U hel caruurtaada waxqabadyo maad leh.
- Hel caawimaad sidi aad uga shaqeyn leheyd shaqo guriga.
- Tag fasalo iyo dhacdooyin maad leh.
- Adeegso qalabyo kala duwan sida makiinada harqaanka, qalabka wax lagu duubo iyo madbacado 3D ah.

## MIYAAN U BAAHANAHAY KAAR LAYBAREERI?

Uma baahnid kaarka maktabadda si aad uga qeyb gasho dhacdooyinka iyo barnaamijyada sida Plaza, storytime, fasalada kumbiyuutarka ama ideaLABs. Kaarka maktabaddu waa bilaash waana ay fududahay inaad sameysato! Booqo mid ka mid ah xaruumaha maktabadda guud ee Denver adigoo sita aqoonsigaaga iyo wax cadeynaya cinwaanka aad dagantahay. Aqoonsigu waxa uu noqon karaa kan state kasta, ama baasaboorka wadan kasta, ama ID-ga qunsuliyadaada.

DENVER PUBLIC LIBRARY



## WAXYAABO AAD KARAKA UGA AMAAHSAN KAARKA LAYBAREERIGA:

- Buugaag iyo buugaag elektaroonik ah.
- Buugaag duuban iyo buugaag duuban oo elektaroonik ah.
- Muuqaalo (DVD, BluRay iyo kuwa live ah)
- Heeso (CD iyo kuwa live ah)
- Majalado ama majalado dijital ah.
- Joornaalo
- Qalabka Wi-Fi ga
- Kaarar lagu gali karo matxafyada iyo beeraha states-ka
- Iyo kuwa kaloo badan

## BARNAAMIJYO IYO ADEEGYO

Booqo webseedka maktabadda –Denverlibrary.org– si aad u hesho xog ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada dhamaan 26 goob ee maktabadda.

**Plazas**
Waa bulsho furan taasoo ay isugu yimaadaan kuna xiriiraan dadka soo galootiga ah ee iskaga yimid dhamaan daafaha caalamka, waxqabadyada barnaamijkaan waxaa ka mid ah ku tababarashada luuqada English-ka, isku diyaarinta qaadashada dhalashada, caawin kumbiyuutar, farshaxan iyo farsamo, dhisida bulsha iyo waxyaaba kaloo badan.

**Baahiyaha bulshada**
La kulan xeeldheere si uu kaaga caawiyo inaad indha-indheysato baahida bulsho ee aad qabto sida hooy, guriyeyn, cunto, ceyr/faa'iido, caafimaadka dhimirka, daryeel caafimaad, hab isticmaalka shey iyo kuwa kaloo badan... kaliya na weydii!

**Storytimes**
Sheekooyin, heeso, mustiko iyo waxyaabo kale oo loogu tala galay nuunayaasha, ilmaha yaryar iyo waalidkood amaba barbaariyayaasha ayaa lagu soo jeediyaa English iyo Spanish.

**Fasalada kumbiyuutarka**
xisado iyo adeegsi shakhsiyeed ayaa lagu qaataa arrimo badan oo quseeya tiknoolojiyadda, bilaaw ilaa dhamaad , waxaana lagu soo jeediyaa English iyo Spanish.

**IdeaLABs**
ideaLAB: Sameeyayaashu waa bulsho bilaash ah oo lagu sameeya waxyaalo badan. ideaLABs ka maktabadda waxa ay caawiyaan qofkasta oo sameynaya website, muuqaal, game, hees iyo waxyaabo kaloo badan. Iyadoo qalabka yaala goobuhu uu kala duwanyahay, hadana ideaLAB-ka faraca maktabadda ee Redolfo "corky" Gonzales waxa uu diirada saaraa waxyaalaha la tolo: qalabka tolliinka,dun iyo canjlada wareegta kuwaaso dadka ka caawinaya iney sameeyaan waxyaabo badan, sida dharka, walxaha lugu qurxiyo guryaha, farshaxanada faaybarka ah iyo waxyaalo kaloo badan. Qalabkeeda hormarsan iyo taageerada shaqaalaheeda, IdeaLABs waxa ay kuu suurta galineysaa adeegsiga waxyaabo ay adkeyd in la helo. Ma jiraan wax kaar maktabadeed ah oo lagaaga baahanyahay.

## ERAYADA AAN ADEEGSANAY:

- **borrow** ama **check out:** inaad sheey guriga u qaadato in muddo ah.
- **Due date:** maalinta ay waajibka tahay in sheyga lagu soo celiyo maktabdda.
- **items** ama **materials:** buugaag, muuqaalo, heesho iyo waxyabaha kale ee ay maktabaddu kuu heyso si aad u adeegsato.
- **Librarian:** xirfadle tabaran kaasoo kaa caawin kara inaad barato sida loo adeegsado maktabadda iyo sidi aad u heli leheyd xogta aad u baahantahay.
- **library card:** kaar xubinnimo oo bilaash ah kaasoo aad u baahantahay si aad maktabadda wax uga amaahsato.
- **Photo ID:** kaar cadeyn ah kaasoo muujinaya magacaaga iyo sawirkaaga. Kaarku wuxuu noqon karaa kaar state kasta, ama baasaboorka wadan kasta ama ID-ga qunsuliyadda. Keenso wixi aad heysato waana aan kula shaqeyn doonaa si aan kuugu sameyno kaarka maktabadda.
- **proof of address:** boono ama risaalo uu magacaagu ku qoranyahay taasoo cadeyneysa meesha aad ku nooshahay.
- **Receipt:** warqad sheegeysa sheyga aad amaahsatay iyo ilaa goorma ayaad heysan kartaa.
- **Renew:** codsiga inaad sii dheereysato mudada shey aad amaahsatay.
- **Return:** soo celinta waxyaalihi aad maktabadda ka amaahsatay.